Busbus ama hablabaas (Varicella)

Waa maxay cudurka busbusku?

Busbuska, oo waliba loo yaqaan hablabaas, ayaa ah cudur u keeno fayras si fudud ugu faafi kara dadka kale.

Waa maxay calaamadaha cudurka busbusku?

Furuuruc soo yaaca ayaa badanaa calaamadaha ugu horreeya ee cudurka busbuska carruurta ah. Dadka qaangaarka ah ayaa dareema daal oo yeesha qandho 1 illaa 2 maalmood kahor furuuraca. Furuuruc ayaa u soo baxa si finan guduud ah ama midab beddelan leh oo isku beddela finan cuncun leh oo dheecaan ka buuxo. Dheecaanka ayaa laga yaabaa inuu finanka ka soo dareero kahor intayna engegin ee ayna meeshu qolofaysan.

Sidee lagu faafiyaa busbuska?

Busbuska ayaa lagu faafiyaa si fudud marka la taabto finanka busbuska ama hawada marka qof qaba busbus u qufaco ama hindhisoodo. Fayrasku in badan kuma noolaado meelaha dushooda.

Markuu qof taabto ama ku dhawaado fayraska, waxay caadi ahaan qaadataa qiyaastii 2 toddobaad inuu busbusku muuqdo, laakiin waxa ay u dhaxayn kartaa 10 illaa 21 maalmood.

Ayaa ah inuu qaato tallaalka busbuska?

Talaalka, ama irbadaynta, ayaa habka ugu wanaagsan ee loogaga hortago ah busbuska. Carruurta, tobaneeyo-jirayaasha, iyo dadka qaangaarka ah ayaa ah inay qaataan laba qiyaasood oo tallaalka busbuska ah.

- Carruurta ayaa ah inay qaataan qiyaastooda ugu horreysa markay yihiin 12 illaa 15 bilood jir iyo ta labaadna 4 illaa 6 sanno jir markay yihiin.
- Carruurta aan qaadan tallaalka ayaa dabaqabatayn wali ku samayn karta. Carruurta 12ka sanno jirta iyo kuwii ka yar ayaa qaadan doona wadar ahaan laba qiyaasood oo ugu yaraan 3 bilood in isku kala jirta lagu siiyo.
- Maadaama ay jiraan halis sare oo dhibaatooyin caafimaad ah, dhammaan dadka ah 13 sanno iyo kuwa ka waynba ee aan waligood qaadin busbuska ama aan laga tallaalin ayaa ah inay qaataan laba qiyaasood in isku kala jirta 4 illaa 8 toddobaad.
- Tallaalka busbuska ma aha in qofka la siiyo muddada uurka.

Inta badan dadka la tallaalay busbusku kuma dhici doono. Haddii qofka la tallaalay uu cudarka busbusku ku dhaco, badiyaa waa mid sahlan, oo finanku wey ku yar yihiin, oo waxay qandho aan darnayn ama qandhaba ma leh. Tallaalka busbuska ayaa ka hortaga badiyaa dhammaan xaaladaha darnaanta cudur.

Miyuuna busbusku ahayn cudur aan darnayn?

Inta badan dadka caafimaadka qaba ka soo kabta busbuska ooaan lahayn calaamado daran. Hase yeeshee, cudurka ayaa sababi kara dhibaatooyin caafimaad oo daran, sida:

- Caabuqyo maqaarka iyo nudadka jilicdasan (sida caabuqyada staaf ama streb)
- Fuuqbax
- Oofwareen (kolba-aariyo)
- Caabuqa maskaxda (sida ensefalaytas)
- Halis ku timaad ilmaha aan dhalan

Ayaa leh halista ugu sareeya inay aad ugu bukoodaan?

Dadka leh nidaamka difaaca jirka ee diciifka ah iyo haweenka uurka leh ayaa halista ugu sareeya ee aadka loogu bukoodo busbuska leh. Haddii ay u feydsamaan fayraska busbuska, waa inay la xiriiraan inay bixiyahooda daryeelka caafimaad isla markaaba.

Ma leeyhay dawayn busbusku?

Ku dhex qubaysiga biyo leh Calamine lotion iyo Aveeno (budada sareenka) ayaa laga yaabaa inay qofka ka yareyso iwoxogaa cuncunka. Ciddiyaha oo nadiif laga dhigo oo la gaabiyo laga yaabaa inay kaa caawiso ka hortagga caabuqa ka yimaad is-cuncunka.

Asbiriinta ama waxyaabaha asbiriinta leh ma aha in loo isticmaalo carruurta si looga naaquso qandhada. Dawooyinka aan lahayn asbiriinta sida acetaminophen (caadi ahaan loo yaqaan Tylenol®) ayaa lagu talinayaa.

Dadka jira 13 sanno iyo kuwa ka wayn ayaa ah inay la xiriiraan bixiyaha daryeelkooda caafimaad si ay u ogaadaan haddii ay jiraan ku dawayn kale oo habboon.

Markee ayuu qofka qaba busbusku dad qabadsiin leeyahay?

Qofka ayaa ku faafin kara cudurka busbuska dadka kale 1 illaa 2 maalmood kahor intayna finanku muuqan. Qofka ayaa weli faafin kara fayraska illaa goobaha finanku ayna engegin oo ayna qolofaysan. Waxay qaadataa qiyaastii 4 illaa 7 maalmood kaddib markuu furuurucu bilowdo inay finanku engegaan.

Dadka laga tallaaley ee hase yeeshe qaada busbuska ayaa lahaada firan tiradoodu ka yar sdia kale finaankuna badiyaa ma yeeshaan dheecaan. Waxay faafin karaan busbuska illaa intay finanku baaba'ayaan oo finan cusbi cusub kusoo baxayaan muddo 24-saac gudahood ah.

Intee in le'eg ayay tahay inay carruurta busbuska qabtaa inay ka joogaan dugsiga ama xannaanada ilmaha?

Carruurta qabta busbuska ayaa ah inay joogaan guriga illaa inta finanka busbusku ay engegeyaan oo ay qolaf yeelanayaan.

Carruurta tallaalan ee yeesha busbuska ayaa laga yaabaa inayna yeelan finandheecaan leh. Xaaladdan oo kale, waa inay guriga joogaan illaa intay finanku ka baaba'yaan oo ayna finan cusubi ka soo bixin gudahood muddo 24-saac ah.

Maxaa la samayn karaa si looga hortago faafidda busbuska?

Tallaalka ayaa ah habka ugu wanaagsan ee lagaga hortago faafidda busbuska. Intaa waxaa u dheer, iska ilaali ju dhawida dadka kale ee buka, gacmahana iska dhaq had iyo jeer, oo guriga joog haddii aad bukto.

Sidee ayaan ilmahayga uga ilaaliyaa haddii uu jiro cudur dillaac busbus?

Markuu jiro cudur dillaac busbus, Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) ayaa ku talinaysa in la tallaalo carruurta aan weli qaadan laba ka duritaan busbus ama uuna ku dhicin busbus. Xaaladaha cudur dillaacitaanka qaarkood, MDH ayaa laga yaabaa inay ku taliso in carruurta aan la tallaalin ka joogto dugsiga ama daryeelka ilmaha oo ay joogaan guriga.

Minnesota Department of Health
Vaccine-Preventable Disease Section
PO Box 64975, St. Paul, MN 55164-0975
651-201-5414
www.health.state.mn.us/immunize

To obtain this information in a different format, call: 651-201-5414.